

Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ee COVID-19 hada waa uu aqbalayaa codsiyada qoysaska raba in laga gargaaro guryaha.

Fadlan dib u eeg akhbaartan soo socota si aad u eegto inaad xaq u leedahay inaad codsato iyo in kale iyo si aad wax uga ogaato sida barnaamijku u shaqeeyo. Baahida loo qabo barnaamijka oo sarraysa darteed, codsadyaashu waxay la kulmi karaan muddo sugitaan dhowr toddobaad ah ama ka badan in la fiiriyey arjiga.

Waa maxay Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ee COVID-19?

Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ee COVID 19 waxa uu siiyaa gargaar ka bixinta lacaga guryaha ah dadka si uu u caawiyo ka hortagga guryo ka saarida, hoy la'aanta iyo si ay u helaan xasilooni dhanka deegaanka ah kireystayaasha iyo mulkiilayaasha guryaha ee xaqqa u leh. Maamulayaal ka socda deegaanka ayaa dib u eega codsiyada shakhsiyadka iyo qoysaska codsanaya gargaarka si ay u xaqiijiyaan xaq u yeeladka ayna u dhameeyaan hawsha bixinta kharashaadka xaqqa u leh in la bixiyo iyagoo matalaya qoysaska.

Xaq ma u leeyahay anigu inaan codsato?

Si ay xaq ugu yeeshaan gargaarka dhanka guryaha ah, qoysaska waa khasab inay ka soo baxaan **dhamaan** shuruudahan soo socda:

- Inaad Minnesota degan tahay.
- Inaad tahay kireyste ama mulkiile dakhligiisu uu yahay ama uu ka hooseeyo 300% ee habraaca dowlada dhexe ee saboolnimada, iyadoo si gaar ah loo eegayo kuwa dakhligoodu uu yahay ama ka hooseeyo 200% ee habraacyada dowlada dhexe ee saboolnimada. Si aad u eegto in dakhligaagu xaq u leeyahay, fadlan eeg ([FY 2020 Federal Poverty Guidelines](#)).
- Aad leedahay kharashaad aad gashay ka dib Maarso 1, 2020 oo **aan wali la bixin**. Gargaarka dhaqaalaha dhanka guryaha waxaa loo isticmaali karaa uun kharashaadka xaqqa u leh ee la galay mudadii u dhaxeysay Maarso 1, 2020 ilaa iyo Deseemabr 30, 2020.
- Aan awoodin inuu bixiyo hal ama in ka badan oo ah bixinta lacagta la isku leeyahay iyadoo sababtu tahay xaalad caafimaad oo degdeg ah oo timid oo keentay shaqo la'aan, jiro ama arrimo kale oo u dhacay cudurka dillaacay ee COVID-19 awgii.

MUHIIM: Milkiileyaasha leh guryaha ay amaahdooda taageerto federaalku xaq uma yeelan doonaan caawimaad.

Haddii aad haysatid amaahda guriga oo ay federaalku taageerto oo hoos imanaya Sharciga CARES Act (oo ay ku jiraan amaahda laga helo hay'adaha sida Maamulka Guryeynta Federaalka, Maamulka Howlgabka Ciidanka, Waaxda Beeraha Horumarinta Reer Miyiga ee Mareykanka, Fannie Mae, Freddie Mac), waxaa lagaaga baahan doonaa inaad la xiriirto adeegaha amaahdaada guriga si loo helo ka dhaafitaan khaas ah, wax ka beddelka amaah ah, iyo/ama in ladejiyo qorshe dib u bixin. Soo booqo www.consumerfinance.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Hadii hadda aad hesho kiro gargaarid dakhliga ku xiran (sida, Xaashida Guryaha, gargaar ku salaysan barnaamij, ama qaab kale oo gargaarid kiro ah oo uu gobolku ama dowlada dhexe ay leedahay), inta badan xaq uma leh inaad ka codsato gargaar kiro ku saabsan Barnaamijkan Gargaarka Guryaha ee COVID -19. Wali waa aad codsan kartaa gargaar ah kharashaadka korontada ee xaqqa u leh in lagaa bixiyo.

Kharasho caynkee ah ayaa la bixinayaa?

Hadii loogu baahan yahay guri ku sii jirid, la iska dhowr bara-bax, iyo waxa waqtigii loogu talagalay in la bixiyo la soo dhaafay, kharashaadka xaqqa u leh waxaa ku jira laakiin aan ku wada koobnayn:

- Bixinta kirada
- Bixinta amaahda (Mortgage) (canshuurta guryaha iyo caymiska kuwa laga hor-tagayo in lala wareego)
- Qandaraasyada guriga
- Kirada dhulka guryaha la qaado la dhigto
- Lacagta dhulka guriga la dhigto laga bixiyo
- Bixinta korontada (sida: korantada, biyaha, bulaacada, gaaska dabiiciga ah, qashinka)
- Bixinta Khidmadaha ururada Mulkiilaha
- Caymiska mulkiilaha guriga
- Kharashyo kale oo guryaha la xiriira oo ay ansaxisay hay'ada Guriyeynta Minnesota (Minnesota Housing)

Waxa aan u malaynayaa inaan xaq u leeyahay barnaamijkan. Waa maxay nidaamka codsiga?

Waxaa jira sedex talaabo oo waaweyn oo ku saabsan nidaamka codsiga:

1. Ogaanta Xaq u yeeladka hore
2. Ka buuxinta Foomka Codsiga Weyn ee Qoyska ee Khadka (online) ka (foomka codsiga)
3. La shaqeynta maamulaha deegaanka

Talaabada 1: Ogaanta Xaq u Yeeladka Hore

Waxaa jira sedex jid oo lagu ogaado xaq u yeeladkaaga:

- Wacid 211 (Khadka Bilaashka ah: 1.800.543.7709; Deegaanka: 651.291.0211)
- Booqasho [211unitedway.org](https://www.211unitedway.org)
- Dhambaal ugu dir "MNRENT" ama "MNHOME" lambarka ah 898-211

Greater Twin Cities United Way Khadkeeda caawinta ee 211 waa Ilo Caawin ah (Resource Helpline) oo leh shaqaale afaf badan ku hadla oo loo carbiyey inay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan Barnaamijka Gargaarka Guryaha ah ee COVID-19 waxa aana la heli karaa 8:00 subaxnimo - 8:00 fiidnimo Isniinta ilaa iyo Jimcaha.

Wac ama dhambaal u dir ama gal khadka (online) ka, mar walba waxaa lagu waydiin doonaa su'aalo dhowr ah oo isku mid ah oo horudhac ah oo ku saabsan xaq u yeeladka. Hadii aad ka soo baxdo shuruudaha xaq u yeelka, waxaa lagu gudbin foomka codsiga ee khadka (online) ka waxa aadna xulan kartaa maamule nawaaxigaaga ah si uu kaaga caawiyo hawsha codsiga. Waxaa dhici karta inay ka jiraan in ka badan hal maamule nawaaxigaaga, waxaad dooran kartaa maamulihii aad rabto ee u adeega nawaaxigaaga.

Hadii aadan xaq u lahayn gargaarkan dhanka guryaha ah, markiiba waa lagula socodsiiin doonaa arrintaa waxaana lagugu xiri khayraadyo kale hadii la heli karo.

Talaabada 2: Buuxi Foomka Codsiga Weyn ee Qoyska ee Khadka (online) ka

Hadii aad ka soo baxdo shuruudaha xaq u yeeladka hore waxaa aad ka sameysan doontaa xisaab (account) khadka (on-line) ka waxa aadna buuxin foomka codsiga buuxa, oo ay ku jiraan:

- Xulasho ku saabsan nooca gargaarka guryaha ah ee aad codsanayso,
- Soo geli (Upload) dukumiintiyada dakhliga iyo

- Bixin cadaymo ku saabsan kharashaadka guryaha ee aan wali la bixin ee la iska rabo.

Hadii aadan heli karin kumbuyuutar ama aad u baahan tahay wax kale oo caawimaad ah, waxa aad codsan kartaa gargaar si lagaaga caawiyo samaysiga xisaabtaada (account) iyo buuxinta codsiga oo dhan.

Fadlan ogow in go'aaminta xaq u yeeladka kama dambaynta ah iyo awoodida bixinta wax gargaar ah oo dhanka guryaha ah ay ku salaysan yihiin akhbaarta lagu bixiyey foomka codsiga. Buuxinta foomku ma aha hubaal in gargaarka dhanka guryaha ah la bixin doono.

Guriyeynta Minnesota ma aqbali karto ama ma fulin karto codsiyada kaalmada guriyeynta. Arjiyada ay hesho Guriyeynta Minnesota dib ayaa loogu celin doonaa soo diraha LAMANA galindoona sistam qabashada arjiyada.

Talaabada 3: La shaqeynta maamule deegaankaaga jooga

Marka arjigaaga la soo diro, maamule maxalli ah ayaa kula soo xiriiri doona si uu kaagala xaajoodo arjigaada, u soo ururiyo una eego dukumintiyada loo baahan yahay oo uu, haddii lagu ogolaado, u soo saaro bixinta lacagaha kaalmada guriyeynta.

*Baahida loo qabo barnaamijka oo sarraysa darteed, waxay ku qaadan kartaa dhowr toddobaad ama in ka badan in maamulka deegaankaagu kula soo xiriiro kadib marka aad gudbisoo foomka arjiga.

Soo uruuri dukumiintiyada soo socda hadda si aad diyaar ugu noqoto marka uu kula soo xiriiro maamulaha deegaankaaga ah:

- Caddaynta dakhligaaga afartii toddobaad ee la soo dhaafay
- Biilkii wakhtigii la bixin lahaa la dhaafay ama ogeysiiska aad dooneyso in lagaa caawiyo
- Magaca, lambarka taleefanka iyo cinwaanka emailka qofka ama ganacsiga lacagta la siin doono (haddii la ogolaado)
- Waad ogeysiin kartaa milkiilaha gurigaaga ama adeegaha amaahda guryaha inay u baahan doonaan inay soo buuxiyaan foomka W-9 haddii arjigaaga la ogolaado. Foomamka W-9 loogama baahna shirkadaha adeegyada. Foomkani wuxuu sababayaa dib u dhac badan oo ku yimaada lacag bixinta u qalanta.

Miyey jiraan cadad ugu yaraan ama ugu badnaan ah oo cayiman oo aan codsan karo?

Waqtigana, ma jiraan cadad ugu yaraan ama ugu badnaan ah oo cayiman oo aad codsan karto. laakiin, cadadka gargaarka guryaha ah ee la ansaxiyaa waa khasab inuu noqdo kharashaadka xaq u leh in la bixiyo ayna gargaaran dukumiintiyada cadeyn ah. Codsiyada gargaarka guryaha oo dhan waa in barnaamijku dhaqaale u heli karaa horta.

Muddo intee ah ayey qaadataa in lagu dhameeyo hawsha codsiga?

Waxay qaadan kartaa dhowr toddobaad ama ka badan laga bilaabo waqtiga la soo gudbiyo arjiga ilaa inta maamulka maxalliga ah uu kula soo xiriirayo si uu howsha u sii wado

Dherarka mudadda lagu dhamaynayo hawsha codsigaaga waa ay kala duwan tahay, waxaana saameeya arrimo sida inaad u baahan tahay caawimaad ah dhanka dukumiintiyada ah, dhamaystirka ahaanta dukumiintiyada iyo inta codsi ee uu tixgelinayo maamulahu markaa.

Soo uruuri dukumiintiyada soo socda hadda si aad diyaar ugu noqoto marka uu kula soo xiriiro maamulaha deegaankaaga ah:

- Caddaynta dakhligaaga afartii toddobaad ee la soo dhaafay
- Biilkii wakhtigii la bixin lahaa la dhaafay ama ogeysiiska aad dooneyso in lagaa caawiyo
- Magaca, lambarka taleefanka iyo cinwaanka emailka qofka ama ganacsiga lacagta la siin doono (haddii la ogolaado)
- Waad ogeysiin kartaa milkiilaha gurigaaga ama adeegaha amaahda guryaha inay u baahan doonaan inay soo buuxiyaan foomka W-9 haddii arjigaaga la ogolaado. Foomamka W-9 loogama baahna shirkadaha adeegyada. Foomkani wuxuu sababayaa dib u dhac badan oo ku yimaada lacag bixinta u qalanta.

Maxaa dhici hadii la go'aamiyo in aanan xaq u lahayn gargaarka ama la ii diido?

Waa lagula socodsiin sababta aadan xaqqa ugu lahayn waxaana laguuri diri khayraadyo kale hadii la heli karo.

Waxaa la ii diiday gargaarka dhanka guryaha ah ee COVID-19. Ma jiraan nidaam racfaan qaadasho ahi?

Haa. Fadlan eeg nidaamka racfaanada si aad uga hesho akhbaar dheeraad ah.

Ma codsan karaa gargaar in ka badan hal mar?

Haa, waad soo gudbin kartaa codsi dheeraad ah oo ku saabsan caawimaad haddii aad haysatid biilasha guriga oo cusub oo u qalma, oo aan la bixinin. Waqtigan, ma jiraan wax xadidaad ah oo ah inta goor ee aad codsan karto gargaarkan.. Qoysasku waxay u baahan doonaan inay soo raaciyaan dukumiintiga dakhliga arji kasta oo cusub.

Fadlan la soco inaad hal arji ku codsan kartaan gargaar in kabadan hal kharash oo la xiriira guryaha oo u qalma.

Macluumaad iyo Dukumiintiyoy caynkee ah ayaan u baahnaan doonaa in aan bixiyo si codsigayga loo ansaxiyo?

Waxaa lagu waydiin doonaa inaad keento macluumaadyadan soo socda:

- Lambarka Aqoonsiga shakhsiyanka ah ee mid ka mid ah kuwa soo socda:
 - Laysinka darawalka/Aqoonsiga (ID) gobolka
 - Lambarka Dal-ku-galka (Passport) (Ma aha khasab inuu noqdo dal-ku-gal U.S. ka)
 - Lambarka Sooshal Sakuuratiga (Social Security)
 - Lambarka Aqoonsiga (ID) Qabaa'ilka
 - Lambarka Diiwaangelinta Ajnabiga (Alien Registration Number)
 - Lambarka Aqoonsiga Shakhsiga Canshuur Bixiyaha ah [Individual Taxpayer Identification Number (ITIN)]
 - Kuwa kale: Fadlan cadee aqoonsiga aad bixinaysaa kuwa ay yihiin

- Haddii aan aqoonsi la haysanin, waxaad calaamadeyn kartaa sanduuqa "Ma lihi aqoonsi."
- Xaqiijin lacagta baaqiga ah ee lagugu leeyahay (biilka korontada, biilka kirada/amaahda guriga, iwm.)
- Akbaarta laga xiriir qofka ama ganacsida lacagta la siinayo (mulkiilaha, shirkada amaahda, shirkada korontada, iwm.)
- Cadeyn ah dakhligii guud ee ku soo galay afartii asbuuc ee la soo dhaafay

Dukumiintiyada aqoonsiga shaqsiga uma baahna in la soo diro. Dhammaan dukumiintiyada kale, waxaad awoodi doontaa inaad mariso ama aad ka qaado sawir si aad u soo geliso (upload) dukumiintiyada la iska rabo foomka codsiga ee khadka (online) ka. If haddii jeceshahay inaad u keento nuqulo (copies) warqado ah, fadlan kala shaqee taa maamulaha deegaankaaga. Haddii aadan awoodin inaad bixiso noocyada dukumiintiyada ah ee la iska rabo, waxa aad la falanqayn kartaa wixii kale oo la yeeli karo maamulaha deegaankaaga ee aad xulatay.

Mulkiilaha guriga iska lehi ma codsan karaa gargaar isagoo wakiil ka ah kireystaha uu kirada ku leeyahay?

Maya. Kireystayaashu waxa ay u baahan yihiin inay si toos ah u dalbadaan lacagta kirada lagu leeyahay. Haddii codsiga gargaarka dhanka guryaha la ansaxiyo, lacagta waxaa si toos ah loogu diri mulkiilaha guriga leh. Mulkiilaha guriga waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu la wadaago macluumaadka ku saabsan barnaamijkan oo uu gacan ka geysto bixinta dukumiintiyada lagama maarmaanka u ah qoyska si ay u buuxiyaan arjiga.

Ma khasab baa inaan ka qayb galo wax barmaamijyo ah oo la sameynayo si aan u helo gargaarkan?

Ma jiraan wax barmaamijyo ah oo ay khasab tahay inaad ka qayb gasho si kolkaa aad u hesho gargaarkan.

Ma khasab baa inaan maro barnaamijka la Yiraa (Coordinated Entry), oo ah hab gobolka oo dhan ka jira oo ka hortagga hoy la'aanta iyo gargaarada khayraadyada, si aan u codsado gargaarka dhanka guryaha?

Uma baahnid inaad maro (Coordinated Entry) si aad u codsato dhaqaalahan.

Haddii aan codsato aana helo gargaarkan dhanka guryaha ah, miyey saameyn arrintayda (Coordinated Entry)?

Codsiga gargaarkan dhanka guryaha ahi ma uu saameyn doonto arintaada kale ee (Coordinated Entry).

Xaq uma lehi barnaamijkan laakiin wali waxaan u baahnahay caawimaad ku saabsan bixinta kiradayda ama amaahdayda (Mortgage). Xaggee ayaan caawimaad ka raadsan karaa?

Booqo shabakada: [Resources for Renters and Homeowners section of our COVID-19 webpage](#) si aad uga hesho liis ilo kale oo dhaqaale laga heli kara ah.

Yaan la xiriirayaa haddii aan su'aalo dheeraad ah ka qabo barnaamijka?

Wac 211 [Khadka Bilaashka ah (Toll Free): 1.800.543.7709; Deegaanka: 651.291.0211].

Shaqaalaha Guriyeynta ee Minnesota kama jawaabayaan wicitaanada ama kama jawaabayaan su'aalaha ku saabsan barnaamijkan. Fadlan wac 211 dhammaan wixii su'aalo ah ee ku saabsan Barnaamijka Caawinta Guriyeynta ee COVID-19.